



Hawsha mashruuca Ankkuri waxaa loogu talagallay dhallinyarada da'doodu ka hooseeyso 15-ka sano, iyo sidoo kale dhallinyarada da'doodu u dhexeyso 15-17-sano jir, iyadoo xaaladda qof walbaa si isaga u gooni ah loo wajahaayo. Ujeedada laga leeyahay mashruucan Ankkuri waa sidii waqti hore saamayn loogu yeelan lahaa xaaladda dhallinyarada, islamarkaana looga hortagi lahaa samaynta falal-dambiyeedka.

Sababaha keeni kara in qofka loo diro hawsha mashruucaan Ankkuri waxaa ka mid ah tusaale ahaan tuhunka ama ku eedeeynta falal-dambiyeedka, isticmaalka maandooriyaha ama arrimo kale oo la xiriira dhinaca nololwanaagga. Waxaana qofka dhallinyarada ah loo diraa mashruuca Ankkuri ee booliska, adeegyada arrimaha bulshada, adeegyada dhallinyarada, iskuulka, badbaadada carruurta ama hay'adaha kale ee wadashaqaynta la leh. Inta badan waxaa qofka dhallinyarada ah lagu soo eedeeyaa in markiisii ugu horraysay uu galay falal-dambiyeed ama uu ka qayb ahaa tusaale ahaan eedeeyn la xiriirta jirdil.

Mashruuca Ankkuri waxaa fulintiisa ka qaybqaadanaaya koox shaqo oo leh khibrado iyo takhasusaad kala duwan, kuwaaso ka kooban wakiillo ka kala socda booliska, adeegga arrimaha bulshada, adeegyada dhallinyarada iyo adeegga caafimaadka ee degmada Vantaa.

Degmada Vantaa waxaa ka jira saddex kooxood oo heer degmo ahaan ah oo ka tirsan mashruucan Ankkuri, kuwaasoo kulma toddobaadkiiba hal mar.

Kulanka mashruuca Ankkuri waxaa looga baarandegaa xaaladda qofka dhallinyarada ah, si loo caawiyo, islamarkaana loo siiyo haggis ku saabsan sidii uu ku heli lahaa taageerada iyo caawimaadda uu u baahan yahay.